Dood- Cilmiyeed

Shirka Garowe iyo Saameyntiisa Geeddi-socodka Siyaasadda Dalka

Dr. Xasan Sheekh Cali Nuur | Dr. Maxamed Ibraahim Cabdi



Axad, 9 June 2019

Mogadishu, Somalia

HORDHAC

Dood-cilmiyeed ay martigelisay HIPAD ayaa maalinimadii 15 May lagu falanqeeyay shirkii dhowaan madaxda dowladda dhexe iyo dowlad goboleedyada ugu soo gabagaboobay magaalada Garowe. Dood-cilmiyeedka waxaa ugu horayntii hadallo ka soo jeediyay Dr. Maxamed Ibraahim Cabdi “Maxamed Deeq” oo ah bare iyo cilmi-baare ku takhasusay cilmiga taariikhda, waxna ka dhiga Jaamacadda Ummadda iyo Dr. Xasan Sheekh Cali Nuur oo ah bare iyo cilmi-barre ku takhasusay siyaasadda iyo amniga waxna ka dhiga Jaamacadda Muqdisho, kadibna waxa doodda ka qeyb qaatay, ka qeyb-galayagasha oo isugu jiray aqoonyahano, siyaasiyiin, diblomaasiyiin, iyo saxafiyiin. Qormadan waxa ay soo koobaysaa hadaladdii ay jeediyeen labada cilmi-baare, dooddii ka qeybgalayaasha, iyo jawaabihii laga bixiyay su’aalihii doodda ka dhashay.

Xukuumadda iyo Muuqaalka Dawladnimada

Dowladnimada waxaa udub-dhexaad u ah jiritaanka tiirar adag oo sharciga ku qotoma; sida hey'ado dowladeed oo kala madax bannaan, heerar kala duwan leh, iskaashi xoogganna uu ka dhaxeeyo. Soomaaliya waxa ay kamid tahay dowladaha ay dowladnimadoodu soo kabaneyso. Maalin walbana heer ayeey soo tiigsaneysey. Siyaasaddeeduna waxa ay aheyd qori-isu-dhiib. Xilligan, waxaa talada dalka haya dowladda uu hogaamiyo madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo" oo la doortay 8dii Febraayo 2017.

Xukummadda talada dalka haysa waxa ay u aragtaa in nidaamka dowladnimo lagu xoojin karo in dowlad-goboleedyada iyo hey'adaha kale ee federaalka ahba ay si toos ah uga amar qaataan dawladda dhexe. Dhinaca kalena, waxa ay xukuumaddu u aragtaa in faragelinta shisheeye ay wiiqdey awoodda xukummadda federaalka ah isla markaasna xoojisey awoodaha dowlad-goboleedyada. Sidaa awgeed, xukuumaddu waxa ay lagama maarmaan u aragtey in xiriir adag ay la yeelato dowladaha deriska ah iyo in ay badasho madaxda dowlad-goboleedyada marka xilligu ka dhamaado si ay booskooda u buuxiyaan madax dawladda dhexe daacad u ah. Arrinkaasina waxa uu meesha ka saaray baahidii loo qabay in masiirka dalka ay si wadajir ah uga wada tashadaan madaxda dowladda dhexe iyo kuwa dowlad-goboleedyada. Qaabka keliya ee ay u wada shaqeeyaana waxa uu kusoo koobmay kulamada Golaha Amniga Qaranka (GAQ), inkasta oo waxyaabo amniga ka baxsan lagaga hadlo mararka qaar, tusaale ahaan, shirkii Baydhabo ka dhacay waxaa lagaga hadlay oo heshiis laga gaaray saami-qeybsiga kheyraadka dalka iyo hannaanka doorasho ee qaranka.

Aragtida dowladda dhexe ay xilligan dalka ku maamusho waxaa qeyb ahaan bari-taaray isbadalka ka dhacay dalka Itoobiya. Isbadalkaas wuxuu sababay in xiriir adag ay yeeshaan labada dowladood ee Soomaaliya iyo Itoobiya taasoo meesha ka saartay xiriirkii tooska ahaa ee ay Itoobiya la lahayd dowlad-goboleedyada. Sidoo kale, xiriirka ay dowladda dhexe la leedahay Kenya ayaa fiicnaa 2dii sano ee la soo dhaafay, inkasta oo uu gadaal kasoo qaraaraadey illaa heer la kala qaatey safiirradii (si ku meel gaar ah). Si taas ka duwan, waxaa dalka Soomaliya saameyn weyn ku yeeshay xasaradii ka dhex aloosantay waddamada Khaliijka, 5tii Juun 2017, iyadoo afar dowladood oo kala ah Sacuudiga, Imaaraatka, Masar iyo Baxreyn ay cunaqabateyn ku soo rogeen dalka Qadar. Arrintaasi waxa ay banaanka keentay kala aragti duwanaashaha dowlad-goboleedyada iyo dowladda dhexe ee ku aadan mawqifka laga qaadanayo khilaafka u dhexeeya waddamada Khaliijka, iyadoo xiisad hor leh ka dhex abuurtay dawlad-goboleedyada iyo dawladda dhexe.

Golaha Iskaashiga Dawlad-goboleedyada

Bishii Oktoobar 2017, waxaa Kismaayo ka dhacay shir ay ku kulmeen dowlad-goboleedyada. Waxa ayna halkaas kaga dhawaaqeen isbahaysi cusub oo dhexdooda ah iyagoo xiriirka u jaray dowladda dhexe sheegayna in aysan la shaqeyn karin. Intaas kuma aysan hakanine waxa ay safarro dibedda ah ku aadeen dalal ay kamid tahay Kenya si ay taageero u helaan. Waxa ayna sheegeen sida u kusoo laaban karo xiriirka ay la leeyihiin dawladda dhexe inuu yahay helidda gacan seddexaad oo dhexdhexaadin karta. Nasiib darro, lama helin gacantii seddexaad. Waxaana ugu soo dhowaa ergeygii gaarka ahaa ee qaramada midoobay, Nicholas Haysom, isagana waxaa 1dii Jannaayo 2019 dalka ka eryay dowladda dhexe. Meeshaasna waxaa isugu soo haray madaxdii Soomaalida oo cid dhexdhexaadineysa aysan jirin.

Muddo sanad ku dhow wax shir ah ma aysan yeelanin dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada. Sidoo kale, Waxaa yaraadey kalsoonida ay dowlad-goboleedyadu ku qabeen golihii shacabka, kadib markii - sida ay qabaan- ay isku milmeen xukuumaddii iyo golihii shacabka, waxaana madmadow uu soo kala dhexgalay xukuumadda iyo aqalka Sare oo u janjeersaday dhanka dowlad-goboleedyada.

Muddo kadib, dawlad-goboleedyada qaarkood waxaa ka dhacay doorashooyin, waxaana isbadalay hoggaankii Koonfur-galbeed iyo kii Puntland. Kadibna waxa soo yara hagaagay xiriirka dawlad-goboleedyada qaar iyo dowladda dhexe. Iyadoo uu sidaas yahay xaalku, ayaa madaxweyne Farmaajo waxa uu ku dhawaaqay shir wadatashi ah oo dhexmara dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada, kaasoo gogoshiisa ay fidisay Puntland, haseyeeshee ma suurogelin shirkaasi inuu qabsoomo. Muddo kadibna waxaa shir Muqdisho lagu qabanayo ku dhawaaqay madaxeyne Farmaajo, cidise dheg jalaq uma aysan siinin baaqaas, wax shir ahna ma qabsoomin.

Baaqa Shirka Garowe

Saddex kamid ah dowlad-goboleedyada oo kala ah, Galmudug, Puntland iyo Jubbaland ayaa ku kulmay Nairobi bishii Abriil, kadibna waxa ay kulamo la qaateen deeq-bixiyayaasha, waxayna isla qaateen in aan laga maarmin soo celinta madashii wadatshiga madaxda qaranka, si loo soo afjaro is-maandhaafka ka jira dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada. Haddaba si arrinkaasi u hirgalo, Puntland oo uu hogaankeedu cusub yahay, xurgufna aysan kala dhaxeynin dowladda dhexe, ayaa gogol dhigtey. Sidaa awgeed ayaa 2dii May, waxaa Garowe isugu tagey madaxdii federaalka (Madaxweynaha iyo Ra'iisal-wasaaraha) iyo kuwa dowlad-goboleedyada, kadib muddo 11 bilood oo aysan yeelanin kulan shaqo.

Dawladda dhexe ayaa sida muuqata ku qasbanaatay ka qeybgalka shirkan, kadib markii ay horay u adeegsatay dhaman waraaqihii siyaasadeed ee gacanta ugu jiray, taasoo keentay in aanay ka baaqan shirka Garowe. Ka baaqashada dowladda dhexe ee shirkan ayaa fursad u abuuri lahayd dowlad-goboleedyada, waxayna xoojin lahayd doodda ay qabaan oo ah in dawladda dhexe aanay si daacad ah ugu hawlanayn taabba-gelinta iyo horumarinta hanaanka siyasdeed ee dalka, taasoo hoos u dhigi lahayd kalsoonida u dhexeysa dowladda dhexe iyo beesha caalamka. Sidoo kale dowladda dhexe waxa ay lumin lahayd wadashaqaynta kala dhexeysa Puntland[1].

Dabeecadda Shirka iyo Ujeedooyinkiisa

Dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyadu waxa ay horay ugu wada-shaqeynayeen gole loogu magac daray Golaha Amniga Qaranka, iyagoo kulamo xilliyeed ku yeelan jirey magaalada Muqdisho ama xarumaha dawlad-goboleedyada sida Baydhabo. Waxaa is weydiin mudan in golahaani yahay sharci iyo in kale? Markii ugu horreysay oo ay xukuumadda Federaalku sameysey golahaan, waxaa codsi u gudbiyey guddoomiyihii hore ee golaha shacabka, mudane Maxamed Shiikh Cusmaan 'Jawaari' isaga oo xukuumadda ka dalbadey inay u soo gudbiso xeerka uu ku dhisan yahay Golaha Amniga Qaranka, si looga sharciyeeyo baarlamaanka. Waxaana ka soo wareegay codsigaa muddo labo sano ah, welina lama horgeynin baarlamaanka. Sidaa awgeed, Golaha Amniga Qaranku ma haysto sharciyadda baarlamaanka!.

Dhinaca kale, 8dii Febaraayo 2017 waxa ay aheyd maalin shacabka Soomaaliyeed ay aad ugu farxeen aadna u soo dhaweeyeen isbedelkii dhacay, iyagoo habeen madoow u soo banaanbaxay si ay ugu dabaal-degaan guusha madaxweyne Farmaajo. Doorashada madaxweyne Farmaajo waxa ay sare u qaadey rajada ay shacabku ka qabeen dowladnimada iyo horumarka dalka. Nasiib darro, isqab-qabsigii dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada waxa uu hoos u dhigey rajadaas. Horumaro badan oo xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo dib-u-heshiisiinta laga sameyn lahaa ayuu cuuryaamiyey isqab-qabsigaasu. Wuxuuna arrinkaasu muujiyay maqnaanshaha aragti guud ee qaranimo iyo karti darro hogaamineed oo meesha ka saartay taageeridii ballaarnayd ee shacabka.

Shirka ka dhacay Garowe ma laheyn ujeeddo cad oo ay isku raacsan yihiin dowlad-goboleedyada iyo dowladda dhexe, sida uu madaxweynaha Jubaland Axmed Madoobe ku sheegay shirkii jaraa'id ee uu Kismaayo ku qabtay 11kii May. Sidaa oo ay tahay, waxaa la isla soo qaaday waxyaabo badan, oo ay ka mid ahaayeen nooca doorasho, qof-iyo-cod, ee la filan karo inay dalka ka dhacdo 2021, xeerka shidaalka oo baarlamaanka la horgeeyay, iyadoo ay dowlad-goboleedyadu ku doodeen in aan lagala tashanin. Waxaa kaloo la isku soo hadal qaaday, maqaamka Muqdisho iyo doorashooyinka ku soo fool leh dowlad-goboleedyada Galmudug iyo Jubbaland, kuwaas oo uu muran badan hareeyey. Waxaa ugu muhiimsanaa qodobada shirka, qodobkii ku saabsanaa soo celinta madashii wadatashiga madaxda qaranka oo aheyd danta ugu weyn oo ay lahaayeen dowlad-goboleedyada. Dhammaan qodobadda aan soo xusney midkoodna iskuma aysan raacin dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada. Waxaa xusid mudan in shirkaas uu ahaa shirkii ugu waqtiga dheeraa ee ay yeeshaan madaxda dowladda dhexe iyo kuwa dowlad-goboleedyada, isaga oo socdey wax ku dhow hal todobaad. Wuxuuna shirku ku soo dhamaadey natiijo la'aan, waxaana lagu kala tagay iyada oo aan laga soo saarin war-murtiyeed.

Natiijo La'aanta Shirka iyo Saameynteeda

Madaxda talada dalka haysa maanta waxaa la gudboon in geedi-socodka siyaasadeed ee dalka ay ka sii wadaan halkii ay gaarsiiyeen madaxdii iyaga ka horeeyay, haddii taasi dhici weydana waxa ay qaadi doonaan mas'uuliyad taarikhi ah. Sababtoo ah iyaga ayay talada dalku gacanta ugu jirtaa, lehna awoodda go'aan qaadashada. Waxaana jiro su'aalo soo noqnoqda inta badan, taasoo ah sababta keentay in madaxda Soomaalidu ay xal ugu heli waayaan caqabadaha hortaagan. Ma waxa ay ka tahay aqoon yari iyo karti xumo? mise dananyn la'aan iyo dareen la'aan mas'uuliyadeed ayaa jirta? Haddii ay aqoon yari ka tahay, waxaa iyadana la is weydiin karaa, maxeey u raadsan waayeen cid ka caawisa oo kala talisa xal u helidda waxyaabaha aanay garanaynin? Waxa ay u badantahay in labada arrimoodba is biirsadeen – in aysan dan ka laheyn iyo in aqoontu ku yartahay-. Waxaa yar inaad aragto hogaamiye oranaya talo ayaan u baahanahay, isaga oo ay daacad ka tahay. Qof kasta qumanihiisa ayaa qoorta ugu jira. Sida uu wax u arko inuu iska badalana diyaar uma ahan. Taas waxeey keeneysaa in uu hakad galo geedi-socodka siyaasadeed ee dalka.

Nasiib darro weyn waxaa ahaa in shirkii Garowe kadib, shir kale oo lagu ballamey uusan jirin si wixii looga heshiin waayay Garowe, looga wadahadlo madal kale oo suuragelisa in la gaaro heshiis. Waxa ay aheyd in madaxdu ugu yaraan ay caawimaad ka dalbadaan khubarada siyaasadeed, odayaasha dhaqanka iyo culamaa'udiinka si ay wax ula xalliyaan, maadaama ay iyagu heshiin waayeen, sidoo kalena aysan wax walba xallin karin.

Natiijo la'aanta shirka Garowe waxa ay saamayn ballaaran ku yeelanaysaa hanaanka siyaasadeed ee dalka, waxaana ceeb dusha u ridanaya dhamaan Soomaalida oo u muuqanaya kuwa aanan maarayn karin arrimahooda, iyada oo aan loo kala eegin madaxda dowladda dhexe, kuwa dowlad-goboleedyada, iyo guud ahaan shacabka oo noqday "hal labo midigle dheelmay" oo isagoo ay dusha ka saaran yihiin duruufaha amni iyo kuwa dhaqaale ee ka dhashay khilaafka ayaa dhanka kale beesha caalamku ku suntaysaa inuu yahay shacab fashilan!.

Sidaa awgeed waxaa lama huraan ah in xallinta khilaafka loo wada istaago, arrintana laga dhaafo in la shakhsiyadeeyo, iyada oo loo ekeysiinayo in qof dantii laga hor imanayo ama qof kale dantii laga shaqaynayo, maskaxdana lagu hayo in haddii Soomaalidu arrimaheeda maarayn weydo ay cid kale u maarayn doonto, taasoo ah mas'uuliyad darro aad u weyn. Madaxda talada haysa xilligan, waxaa muddadii la doortay uga haray sanad iyo bar, haddii waqtigu lumo oo waxqabad la waayana cidda uu saameynta ugu weyn ku yeelanayo waa iyaga, goorta xilliga doorashada la gaarana cidda lala xisaabtami doono waa iyaga, xisaabtaasoo ah mid aan turid lahayn. Haddii si kale loo dhigo arrinka, garoonka lagu ciyaarayo siyasadda natiijo la'aanta ah waa garoonka dowladda dhexe, waqtiga lumayana waa waqtiga madaxweynaha, sidaa darteed waa inay madaxda dowladda dhexe tanaasul badan muujiyaan, ayna ogaadaan in heshiisku si kasta oo uu u qaraar badan yahay uu dalka iyo dadkaba uga faa'iido badan yahay heshiis la'aanta oo aan qasaarihiisa laga soo kaban doonin xilli dhow.

Waddo Nabadeed Ayaa Horumar Lagu Gaari Karaa

Haddii aan dib ugu laabano geedi-socodka siyaasadeed ee dalka, sida aan wada ognahay, sanadkii 2000 waxaa lasoo dhisey dowladii ugu horeysay burburkii dowladnimada Soomaaliya kadib, dowlad walba waxa ay wax kusoo kordhineysay geedi-socodka siyaasadeed. Laga soo bilaabo madaxweyne Cabdiqaasim Salaad Xasan, waxa uu dib hawada ugu soo celiyey magacii iyo calankii Soomaaliya. Wuxuu khudbado ka jeediyey shirarka sanadlayaasha ah ee Qaramada Midoobay, Midowga Afrika, Jaamacadda Carabta iyo IGAD. Wuxuu soo bilaabey saan-qaadka geedi-socodka siyaasadeed ee dalka, sidaa si la eg ayay madaxweyne Cabdullahi Yusuf Axmed (AHUN) iyo madaxweyne Shariif Sheekh Axmed geddi-socodka siyaasadeed halkiisii uga sii wadeen, illaa ugu danbeyntii la soo gaaray xukuumaddii madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud oo iyadana suurto gelisey federaaleynta dalka, iyadoo dhistey dhammaan dowlad-goboleedyadii dhimanaa. Sidoo kale, waxa ay suurto gelisey in xubin kasta oo baarlamaanka kamid ah laga soo doorto deegaan-doorashada uu ka soo jeedo. Hadaba waxaa looga fadhiyaa xukuumadda madaxweyne Maxamed Cabdullahi Maxamed "Farmaajo", markii uu muddo xileedkeedu dhamaado, in ay la soo shir tagto wixii ay kusoo kordhisey geedi-socodka siyaasadeed ee dalka.

Isku soo wada duub, ummadda Soomaaliyeed waxaa la isugu keeni karaa maslaxo iyo walaaltinimo iyadoo aan la baal mareynin dastuurka dalka, taasoo ah waddada keliya ee noo furan. Ma ahan wax la aqbali karo in wixii ka dhacay Baydhabo xilligii doorashada madaxweynaha dowlad-goboleedka KG ay dib u soo laabtaan. Cidina xoog wax kuma muquunin karto. Waddo nabadeed oo keliya ayuu dalkaani horumar ku gaari karaa. Waxaana muhiim ah inaan ogaano in dawladnimadeenu aanay dhamasytirnayn inta dalka oo dhan dib loogu soo celinayo gacanta dowladda. Waxaa in la xuso mudan in maalinkii dawladnimadeenu burburaysay 1991 uu dalku lahaa in ka badan 100 kun oo ciidan ah, sidaa darteed waxaanan marna suurogal ahayn in la caburiyo oo la isku dayo in awood lagu muquuniyo aragtiyada siyaasadeed ee ka duwan kuwa madaxda dowladda dhexe aaminsan tahay.

Waxaa iyana jirta in culays kale uu ka imanayo dhamaystirnaan la'aanta dastuurka dalka ee qabyada ah oo aanan si cad u qeexaynin:-

- **Hawlaha gaarka u ah dowladda dhexe.**
- **Hawlaha gaarka u ah dowlad-goboleedyada.**
- **Waxa ay wada qabsan karaan dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada oo wada jira ama mid mid.**
- **Waxa ay wada qabsan karaan dowlad-goboleedyada dhexdooda.**

Haddaba waxaa lama huraan ah in sharciyada dalka u qoran oo qabyada ah lagu dhaqmo, wixii aan qornayn waa suurogal in xeer jajab la adeegsado, amaba sharciyada qoran haddii ay la jaan qaadi waayaan hanaanka siyaasadeed ee dalka lagu bedelo sharciyo la jaan qaadi kara duruufaha ka jira dalka. Qofkii xil u qabta ummadda waxa laga doonayaa inuu u hogaansamo sharciyada qoran oo ay ansixiyeen hay'adaha dowladda, waana in madaxdu meel aanay guul ka dhalaynin aanay guul ka raadin oo aanay ku mashquulin khilaafka dowlad-gobleedyada iyaga oo baal maraya sharciyada ay ku dhisan yihiin iyo awoodaha dastuurku siinayo.

Waxaa tilmaan mudan in aanan la isku khilaafsanayn hanaanka federaalka, haseyeeshee lagu kala aragti duwan yahay nooca federaalka iyo qaabka uu ku hirgalayo, dadka qaar federaalka waxa ay u arkaan in looga baxsanayo hanaankii dowladeed (unitary state) ee dalka ka jiray 1960-1990, qaar kale waxa ay qabaan in Itoobiya ka macaashtay federaal, sidaa si la mid ahna ay Soomaaliya ka macaashayso hanaanka federaalka, qaar kale ayaa aaminsan in dowladaha horay u maray badankoodu yihiin federaal, kuwaa oo ay ugu hoorayso dowladda Maraykanka, oo dhistay dowlad awood badan oo adduunku ka haybsato, gudaha dalkeedase ka hirgelisay hannaan u nugul dadkeeda, dhagaysatana talooyinkooda. Waxaase mudan in hoosta laga xariiqo nooca federaal ee aan dooranayno waa in uu noqdo mid dabooli kara baahida ummaddeenna, xaqiijinna kara himilooyinkeeda, waddada keliya oo hannaankaas lagu gaari karana waa wadatashi iyo wadashaqayn joogto ah, iyadoo loo hogaansamayo sharciyada dalka u degsan.

Ku dhaqanka iyo u hogaansanaanta sharciyada dalka u degsan waxa uu kala soocayaa mas'uulka la dooratay ee ku yimid hanaan dimuquraaddi ah, ayna tahay in uu talada la wadaago hay'adaha dowladda iyo shacabka si waafaqasan sharciga, iyo mulkiile maamulaya hanti uu isagu leeyahay iyo dadkii uga shaqaynayay, oo ciddii taladiisa raacdana ay la sii shaqaynayso, ciddii diidana uu eryayo.

Kala Daadashada Hanaanka Dawladnimo

Is-maandhaafka siyaasadeed ee u dhexeeya dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada waxa uu sababay habacsanaan iyo kala daadasho hanaanka dawladnimada, iyada oo tusaale ahaan loo soo qaadan karo habacsanaanta ka jirta golaha shacabka, wadashaqayn la'aanta u dhexeysa dowladda dhexe iyo aqalka sare iyo khilaafka doowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada. Haddii aanan la helin is-faham degdeg ah iyo heshiis dhex mara labada dhinacna waxaa dalka ku soo fool leh maalmo adag.

Waxaa dhab ah in aanay Soomaalidu isku aragti ka ahayn hanaanka federaalka iyo sida uu dalka uga hirgalayo, in kasta oo uu hanaanka federaalku ku xusan yahay dastuurka. Sidaa oo ay tahay, federaalnimadu ma aha arrin ay si sahlan ku garab mari karaan madaxda xilka haysa, waxaana madaxda u furan laba arrin midkood in ay ku shaqeeyaan hanaanka federaalka ama in ay sugaan xilliga aftida loo qaadayo dastuurka, kadibna eegaan haddii aqlabiyaddu u codeeyso baabi'inta federaalka, halkaana ay taageero uga helaan aragtidooda siyaasadeed si waafaqsan sharciyada dalka. Waxaa lama huraan ah si loo xoojiyo xasiloonida siyaasadeed in dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada tillaabo kasta oo ay qaadayaan ay ku saleeyaan sharciyada dalka. Waana in dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyadu garawaaqsadaan inay shirko ku yihiin ilaalinta xasiloonida siyaasadeed iyo horumarinta geedi-socodka siyaasadeed ee dalka. Mas'uuliyadda fashal kasta oo yimaada wey wada leeyihiin, in kasta oo ay mas'uuliyadda culayskeeda ugu weyn ay ku dhacayso dowladda dhexe oo iyadu mas'uul ka ah ilaalinta midnimada iyo wadajirka dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Aragtida Siyaasadeed ee Xukuumadda

Sida ay sheegto xukuumaddu aragtideeda siyaasadeed ee xilligan waxa ay ku salaysan tahay, adkaynta hay'adaha dowladda, la dagaalanka musuqmaasuqa, dib u dhiska hay'adaha maaliyadda, mideynta canshuuraha, la tacaalidda raadadkii dagaalada sokeeye, yaraynta faragelinta shisheeye, sixitaanka hanaanka federaalka ah oo dalka uga hirgalay qaab aan dhamaystirnayn, taasoo sababtay in dowladda dhexe isku daydo toosintiisa, ayna ku heshay taageero badan oo xaga shacabka ah.

Haddaba annaga oo xeerinayna dhamaan duruufahaa, isla markaana aanan ku kaaftoomaynin falaqaynta cilmiga (akadeemiga ah) oo keliya ee eegayna sidoo kale waaqaca iyo xeer jajabka sababay in aragtiyo kala duwan laga haysto hannaanka dowladnimada aan rabno, waa in aan si cad farta uga fiiqnaa mas'uuliydda dowlad-goboleedyadu ku leeyihiin fashilka.

Aragtidan siyaasadeed oo ay madaxda dowladdu soo bandhigeen waa tan keentay in maalmihii hore ay shacabka ka hesho taageero aan xad lahayn, waxaase isweydiin mudan halka ay taageeradaasi ku dambaysay 2 sano kadib. Waxaa muuqanaysa in shacabka ay isu qaban weyday ballanqaadyadii sida sahlan loo yiri iyo hirgelintoodii oo aanay waxba ka suuro gelin. Dhanka kale bilowgii hore dowladda dhexe si aad u jilicsan ayay ula qaadatay dowlad-goboleedyada qorshihii amniga ee dib loogu habaynayay qaabdhismeedka qeybaha kala duwan ee ciidamada dalka (security pact), iyo hanaanka garsoorka, taasoo ay ka dhalatay dood la xiriirta in labada arrimoodba ay dastuurka waafaqsan yihiin iyo in kale. Golaha shacabka ayaa talooyin lagu saxayo qorshihii amniga (security pact) u soo jeediyay xukuumadda, haseyeeshee lagama hoos qaadin, waxaana qorshihii lala aaday shirkii London, May 2017, si taageero dhaqaale loogaga helo deeq-bixiyayaasha. Waxaase yaab iyo amankaag noqday in u jilicsanaantii dowlada dhexe ee dowlad-goboleedyada ay mar qura is bedeshay, kadib khilaafkii dhexmaray dowladaha Khaliijka, kaasoo abuuray kala aragti duwanaansho dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada.

Haddaba khilaafka ka dhex qarxay dowladda dhexe iyo dowlad-gobleedyada oo iyada oo ay sahlan tahay wax ka qabashadiisu haddana loo caal waayay, ilaa uu maanta halis ku yahay geeddi-socodka siyaasadeed ee dalka waxa uu abuuray shaki ah jiritaaanka mushkilad ku aadan sidee xukunka loogu sii neegaadaa oo muddo dheer talada dalka loo sii haystaa, iyadoo loo arkay in khilaafka iyo xasaradaha soo laalaabanaya ay yihiin kuwa looga gol leeyahay in danaha shakhsiga ah la huwiyo danta Soomaaliya. Shakigan ayaa la oran karaa waa midka horseeday in dadku ay la laabtaan taageeradooda, rajadii ay ku xirayeen hanaanka dowladnimadana ay hoos u dhacdo.

sbedelka Siyaasadeed iyo Isbedelka Bulsho

Waa arrin dabiici ah in bulshada Soomaaliyeed oo maraysa xilli xasaasi ah oo kala guur ah ay ku hafato arrimaha siyaasadda oo uu hanaanka federaalku kamid yahay, sababtoo ah federaalka qudhiisa ayaa soo maray marxalado kala duwan, lana soo noolaaday bulshooyin kala gedisan, isla markaana leh muuqaalo kala nooc ah. Waxaa muhim ah in isha lagu hayo baahida bulshadeenu u qabto in lagu sameeyo cilmi baaris lagu ogoaanayo meelaha gaabisku ka jiro, haddii ay ahaan lahayd wacyiga siyaasiga ah, garashada taariikhda iyo ka warhaynta sharciyada lagu dhaqo dalka. Waxaa xusid mudan inay jiraan dad badan oo siyaasadda ku howlan isla markaana aanan wax aqrinin, dastuurka iyo shuruucda dalkana aan war u haynin, sidaa darteed si kasta oo ay madaxda sare ee dowladdu aqoon iyo karti u leeyihiin, wadda sax ah oo dalka samata bixin kartana ugu socodaan, way adkaanaysaa ka miro-dhalinta geeddi-socodka siyaasadeed ee dalka hadii aan la helin howlwadeen leh wacyi, garasho iyo kartı lagu xaqiijiyo himilooyinka ummadda Soomaaliyeed, kaasoo gacan siiya madaxda sare ee dalka.

DHAMMAAD